

Post POST HOLDINGS, INC.

A Post For All

**Janaayo 2025** | ARINTA #5

# Post Consumer Brands waxay Fidiyaan Saameyntooda:

## Iskaashiga Cusub ee Kooxaha Ardayda iyo Ururada Xirfadlayaasha ah

Sanad kasta, Post Consumer Brands (PCB) waxay soo dhaweeyaan koox kordhaya layliyo ah xiliga xagaaga kuwaas oo kala yimaada goobo kala duwan oo gudaha ururka ah. Fasalada leylinta ee xagaaga 2025 waxaa la rajeynayaa in ka mid ahadaan ku dhawaad 50 arday oo kala shaqo duwan sida Maaliyada, Cilmiga Tiknoolijiga, Suuq Geynta, Iibinta, Sahay Keydinta, Injineernimada.

> “
>
> Xafladaha kulliyada iyo jaamacadda waxay muhiim u yihiin in la kiciyo wacyigelinta brand-ka oo ay u dhaqmaan sidii kicinta si loo wado codsiyada leylinta iyo barnaamijyada wareegtada ah.
>
> ***Michelle Krebs, Sr. Maareeyaha Qaadashada Hibada***

Maaddaama uu barnaamijkani sii fidayo, kooxdu waxay aqoonsan tahay muhiimada ay leedahay in si toos ah loola shuraakoobo kooxaha ardayda iyo ururada xirfadlayaasha ah Si aad u hesho tayo kala duwan oo ballaadhan. Kooxda PCB waxa ay si gaar ah ugu guulaysteen dhisida xadhiidhada kooxaha sida Bulshada Injineerada Haweenka (SWE) ee jaamacadaha deegaanka. Shuraakadahani dhaw, oo ay weheliso waxqabadyada bandhigga shaqada, ayaa siiya PCB kooxdeeda xubinada ah kaliya in aysan hormarinin fursadaha shaqada laakin sidoo kale ay ka qaybgeliso ardayda golayaasha yaryar sida doodaha golayaasha iyo fadhiyada macluumaadka kooxda.

Deyrtii la soo dhaafay, kooxdu waxay ku faraxsanayd inay ku dhawaaqdo kordhinta laba iskaashi oo cusub: **Society for Hispanic Professional Engineers** (**SHPE**) **ee Jaamacadda Minnesota** iyo **National Black MBA Association** (**NBMBAA**) **Twin Cities Chapter**. Iskaashi kastaa wuxuu u baahan yahay maalgelin ka timaada madaxda iyo ballanqaadka Safiirada PCB si ay u qorsheeyaan xafladaha oo ay ula falgalaan ardayda.

”Xafladaha kuliyada iyo jaamacadda waxay muhiim u yihiin in lasii wado wacyigelinta brand-ka waxayna u dhaqmaan sidii kicinta si ay u wadaan codsiyada leylinta iyo barnaamijyada wareega,” ayuu yiri Michelle Krebs, Sr. Maareeyaha Qaadashada Hibada.

”Xafladahani waxay ardayda siinayaan fursad ay ku arki karaan waxa ay tahay in laga shaqeeyo Brands Consumer Post oo ay su’aalo ka weydiiyaan shaqaalaha ka hawlgala shaqada. Waxaan ugu mahadcelineynaa inaan ku leenahay iskaashi cajiib ah ganacsiga kuwaas oo si ikhtiyaarnimo ah oo iskaa wax u qabso ah waqtigooda ugu tabarucaya hawlahani. ”

Iyadoo horay la eegayo, kooxda PCB waxay filaysaa sii wadida xoojinta shuraakowga jira iyo ballaadhinta shabakadaas.



# 8-da Su'aalood

## ee Ciare James

*Madaxweyne ku Xigeenka Sare,*
*Madaxa Suuqgeynta, Bob Evans Farms*

### Waa maxay doorkaada Bob Evans Farms oo waa maxay masuuliyadahaaga ugu waaweyn?

*Awooddayda Madaxa Suuqgeynta ahaan ee Bob Evans Farms, waxaan sharaf u arkaa inaan hogaamiyo xeeladaha suuqgeynta guud ee ururkayaga si aan u dhisno sumcada iyo muuqaalka asataanteena oo aan u soo jiidano baahida macaamiisha. Doorkani, waxaan kormeerayaa dhammaan qaybaha shaqada si aan ugu daro fikradaha macdanta, xayeysiinta, xiriirka dadweynaha, maaraynta faylalka, gudbinta dhuumaha hal-abuurka iyo horumarinta joogtada ah ee kooxdayada tayada leh. Dadaalladani la isku daray waxay caawiyaan faafinta warka wanaagsan ee ku saabsan faylalka yaabka leh ee cuntooyinka macaan.*

### Xagee ku barbaartay?

*Waxaan ku dhashay kuna barbaaray dhanka bari ee Cleveland, Ohio.*

### Waa maxay qaybta ugu fiican ee shaqadaada?

*Qaybta ugu fiican ee shaqadeyda waa inaan u qabto shaqo saameyn leh oo aan aaminsanahay saaxiibbadayda aan ixtiraamo oo aan ku istareexo. Anigoo ku jira shaqadani sanado badan, waxaan dhihi karaa Bob Evans Farms waa mid ka mid ah faylalka ugu fudud ee brands-ka iyo shirkadaha in la jeclaado!*

### Maxaa casharo ah oo aad ka baratay kuwaas oo kaa caawiyay nolosha?

*3-da cashar ee iigu sarreeya ilaa hadda waxay ahaayeen:*

***Labadaada "maxaa" iyo "sidee" waa muhiim.*** *Kuma filna inaad keento natiijooyin adag; wadiiqada aad sidaas u samayso ayaa si hoose ii quseeysa aniga. Waxaan nasiib u lahaa inaan la shaqeeyay hogaamiyayaal cajiib ah oo kaga dayday anshaxa wanaagsan, dabeecad fiican iyo daacadnimada sare ay gacan ka geystaan waxqabadka ganacsi ee heerka sare ah.*

***Sare isku qaad marka aad sii fuusha ba.*** *Qofna kuma jiro safarkan nolosha kaligiis. Intii aan shaqadan ku jiray waxa aan nasiib u yeeshay in aan helo dad dan iga lahaa aniga, horumarkayga, guushayda iyo wanaaggayga ba. Waxay iigu doodeen siyaalo muuqda iyo kuwo aan muuqan ba. Marka aan fursad u heesano inaan si la mid u samayno kuwa kale, waa inaan ka faa'iideesanaa; waxaa inoo yaalla abaal anaga iyo iyaga ba.*

***Diiradda saar shaqada.*** *Aad bay u fududaan kartaa in aay dib kuu dhigaan carqaladaha yaryar (ama muhiimka ah) ee ka dhasha inta lagu guda jiro shaqada ganacsiga maalinlaha. Haddi ay tahay jawi ganacsi oo qalafsan ama caqabado dadka dhexdooda ah, waxaa jira waxyaabo badan kuwaas oo isku dayi karo ineey galaan dhexda adiga iyo yoolalkaaga kuwaas aad go'aansatay inaa gaarto. Waa muhiim ah in la baabi'iyo waxyaabaha ku mashquulin karo oo diiradda la saaro hawsha gacanta lagu hayo. Tani sida aay u muuqato waa mid iska cad oo fudud, laakin marka la celcelinaayo waxaa ay noqon kartaa mid adag.*

### Sawabtee ayay DEI muhiim kuugu tahay?

*DEI muhiim ayay ii tahay sawabtoo ah marka si fiican loo sameeyo, waxaa aay keentaa natiijo wanaagsan. Baadhitaanku waa cadyahay inuusan ahay mid fudud oo la sameeyn karo, waxaa aay horseedeysaa natiijooyin ka duwan marka la joogo goobta suuqa.*

### Sidee u hormarisaa isdhexgalka?

*Si firfircoon ayaa u shaqeeyaa sifo isku xasuusiyo in aragtidayda iyo sida aan u arko adduunka aanay ahayn mid keliya. Fahamkeena ku aadan caqabadaha iyo xalinta waxyeeladooda labaduba waxaa wanaajiyay abuurista goob amaan u ah dadka si ay u keenaan aragtidooda iyo fikradahooda gaarka ah miiska. Waxaan ogaaday weydinta su'aalaha wanaagsan iyo raadinta si dhab ah in aan dhegeysto oo si qoto dheer loo fahmo kuwa kale ineey caawiso dhisida isdhexgalka deegaanada.*

### Maxaad u malaynaysaa inay tahay sifada muhiimka ah ee hogaamiye loo dhan yahay?

*Hogaamiyayaasha loo dhan yahay waa kuwo ficil ku jihaysan oo u furan jawaab celinta. Kuma filna in aan si fudud u rabtoono ama aan rajayno in aan noqono ka mid noqoshada, waa in aan si joogto ah u qiimaynaa caadooyinkeena iyo rabitaankeena si aan uga fikirno sida aan wax badan u qaban karno si aan u kobcino ka mid noqoshada kooxahayada, ururada iyo bulshooyinka.*

### Waa maxay badeecada aad ugu jeceshahay Bob Evans Farms?




*Baradhada la shiiday asalka ah ee Bob Evans!*

# Kooxda Taageerada Waalidiinta Shaqeeya Cusub ee Weetabix



**JILL BILLYEALD,**
Maareeyaha Hawlaha Ganacsiga & Aasaasaha Kooxda Waalidiinta Shaqeeya

Dhawaan sahan aay sameesay shirkada Inculsion Without Exception ee Weetabix, 74% ka mid ah kuwa dhammaystiray waxay sheegeen in Weetabix ay tahay meel loo wada dhan yahay oo laga shaqeeysan karo. Inkastoo tani aay tahay hormar wanaagsan marka loo eego sanadkii hore, Weetabix wali waxaay u yaalo shaqo badan oo la rabo ineey qabato sifo u sii wadato oo ogu dhigto shirkada goob loo dhan yahay oo laga shaqeeysan karo.

**Mareeyaha Hawlaha Beecshirada Jill Billyeald waxay heshay goob bannaan dhawaan, taas oo u horseeday inay la dhiso Kooxdii Waalidiinta Shaqada ee ugu horreysay ee Weetabix. Hoos waxa aay nala wadagaysaa qibradeeda ku noqoshada shaqada ka dib fasaxii dhalmada iyo mashruuca cusub ee aay hogaamineeso.**

*Waxaan ka soo shaqeeyay kooxda Beecshirada ee Weetabix in 10 sano ka badan; si kastaba ha ahaatee, gugii 2022 waxaan ku soo noqday shaqada ka dib hal sano oo fasax ah oo aan ku maqnaa fasaxa dhalmada. Kani ma ahayn cunugaygii ugu horreeyey – waxaan oo dhan waxaan sameeyayay intii lagu jiray xiligii caabuqa; si kastaba ha ahaatee, si la yaab leh waqtigani, fasaxa dhalmada wuxuu ahaa mid adag, qibradeydu gabi ahaanba way ka duwan tahay. Waxaan lahaa uur iyo dhalmo si u qaribnaa iyo umusha ka dibna runtii waan isla halgamay jir ahaan iyo maskax ahaanba. Soo laabashadeydii ka dib waxaa cadaaday ineey jireen hooyooyin badan oo kala imaanayay waaxyo kala duwan, oo waxaan bilaawnay inaan si hoose u kulano xiliga qadada si aan u wadaagno sheekooyin oo isku waanino oo isku soo dhawaano. Xiligaasi tani ayaa aheyd waxa aan u baahneeyn – goob amaan ah oo shaqsiyaadaka isku maanka ah aay ku midoobaan, isku aruursadaan oo noqdaan shaqsiyadooda dhabta ah.*

*Waxaan sii wadnay inaan si joogto ah u kulano muddo sanad ah, laakiin waxaan si qoto dheer u ogaa in tani ay noqon karto wax ka badan - in ka badan "soo celinta hooyada" - waxaanan lahaa aragti aan ku kordhinayo fikraddan si aan u mideeyo dhammaan waalidiinta shaqeeya, haddii ay yihiin hooyooyin, aabbayaal, awoowayaasha, walaalaha ama daryeelayaasha guud ahaan shaqada wax soo saarka iyo xafiiska labadaba. Caqabada waxaa isku dheeltirida qoys koraya iyo shaqo oo si joogta ah isku bedalayo oo waxaan rabay inaan bixiyo goob amaan ah oo aay u dhan yahay dhamaan shaqaalaha Weetabix.*

*Oktoobar 2024 waxaan si rasmi ah u furnay Kooxda Taageerada Waalidiinta Shaqeeya taasi oo hada ka gudubtay kulamada qadada oo u gudubtay xafladaha bilaha aay ku jiraan shayda sida la taliyaasha hurdada, waanada sida aad u maareeyn laheyd mustaqbalkaaga iyo kooxda kanaalada Microsoft dadaal badan ku bixiyay tageerida, suuq onleyn iyo muuqaalada dhamaan kulamadeena xafladaha onleynka. Wali waxaan nahay bulsho yar oo ka kooban 20-tan shaqaalo, laakin waxaan ku rajo wenahay inta aan ku sii socono xafladaheena bilaha ah inaan soo kordhino oo aan mideeyno dad badan sawabtoo ah marka la joogo Weetabix waxaan ognahay "Lahaanshaha Ineey Sameeyso Farqiga."*

> "Waxaan sii wadnay inaan si joogto ah u kulano muddo sannad ah, laakiin waxaan si qoto dheer u ogaa in tani ay ka badan karto – in ka badan "soo celinta hooyada" – waxaanan lahaa aragti ah inaan kordhiyo fikraddan si aan u mideeyo dhammaan waalidiinta shaqeeya, haddii ay yihiin hooyooyin, aabeyaal, awoowayaasha, walaalaha ama daryeelayaasha guud ahaan shaqada wax soo saarka iyo xafiiska labadaba.
>
> ***Jill Billyeald***

INCLUSION WITHOUT EXCEPTION

# Post Consumer Brands: Dabaaldegga Dhaxalka Hispanic-ga iyo Gacan Ku Celinta Bulshadeena

Horseedida Bisha Dhaxalka ee Hispanic-ga, Kooxda Kheyraadka Shaqaalaha Isbaanishka ee PCB, LEAD (Latinos Engaging Attracting Developing), waxay diiradda saartay siismada iyo taageerida bulshada. Iyaga oo wata koox u go'an oo xubin ka ah LEAD oo ka socda kooxda Iibka Qaranka ee PCB, kuwaas oo ku nool, ka shaqeeya oo u socdaala dalka oo dhan, waxay ka faa'iidaysteen fursad ay ku sameeyaan saameyn la taaban karo goobaha aay saaid ugu xoogan yihiin Hispanic-ga.

**Dhowr isbuuc ka hor, kooxda waxaa aay qaban qaabisay xaflado badan, oo aay ka mid yihiin deeqda badeecada iyo deeqaha:**

***Xaflada Boorsada Dhabarka ee Big Brothers Big Sisters:*** *Deeqda badeecadaha iyo kafaala-qaadka xaflada ee taageeraya qoysaska dakhligoodu hooseeyo iyo shaqaalaha beeralayda.*

**22 LUULYO**
Madera, California

***Waxbarashada waa Awood – Bixinta Boorsada dhabarka ee Binational of Central California:*** *Deeqda badeecada iyo kafaala-qaadka xafladaha.*

**OGOOSTO 8**
Fresno, California

***Qaybinta Cunnada Canasta ee la Yaqaano:*** *Deeqaha Bisha Dhaxalka ee Hispanic-ga, caawinada cuntada sinaanta ee Minneapolis, St. Paul iyo Austin, Minnesota.*

**SITEEMBAR 19**
CLUES Minneapolis

***La Bonita Market Trunk or Treat:*** *deeqda badeecada iyo la falgalida bulshada oo ka badan 5,000 ka qaybgalayaal.*

**OKTOOBAR 24**
Las Vegas, Nevada

Sr. Wakiilka Iibka tafaariiqda iyo xubinta LEAD Yolanda Cisneros ayaa isku dubariday oo ka qaybqaatay dhowr ka mid ah xafladahani. "Waxay ahayd wax lagu farxo in aan qayb ka noqdo dhacdo aan kaliya matalin Post-ga, laakiin sidoo kale aragto dhammaan dhalaanka iyo qoysaska oo dhoola cadeynaya," ayuu yiri Cisneros.

Dadaalladani waxay muujinayaan sida ay LEAD uga go'an tahay taageeridda iyo kor u qaadista bulshooyinka Hispanic-ga dhamaan dalka.







*Taageerida qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee Bartamaha California, xafladii Fresno waxay siisay 300 boorsada dhabarka ah oo ay ka buuxaan alaabta dugsiga carruurta xaadirka aheyd. Kooxda ayaa sidoo kale qaybisay 1,100 xirmo saxan oo hal adeeg ah. Yolanda Cisneros, Manuel Castillo iyo Sal Diaz ayaa matalayay xaflada LEAD ERG.*









# Bob Evans Farms ayaa U Dabaal Dagaya Bisha Dhaxalka Hispanic-ga

Bob Evans Farms waxay qabteen xaflad dhadhamin ah oo ay ku xigtay qado iyo barasho inay u dabaal degaan Bisha Dhaxalka Hispanic-ga, oo la qabto Siteembar 15 illaa Oktoobar 15-keeda sannad kasta.

Madaxweyne ku Xigeenka R&D Manuel Ortega iyo Sr. R&D Maareeyaha Mike Bunn waxay qorsheeyeen oo diyaariyeen liiska dhadhamida.

**Waxaa ka mid ahaa dhowr suxuun oo macaan oo soo bandhigay dhaqanka Hispanic-ga iyo Latino:**

- **Arroz con gandules** (**bariis leh digir xamaam ah**)
- **Birria tacos**
- **Digaag al pastor**
- **Pork carnitas**
- **Digirta madow**
- **Afakaadhada crema**
- **Plantains** (**tostones**)
- **Tortillas**
- **Pico de gallo**
- **Guacamole**
- **Doolshada Tres Leches**

Intii ay muunad samaynayeen cunooyinkan macaan, ka qaybgalayaashu waxay barteen asalkooda iyo muhiimada dhaqankooda. Shaqaaluhu waxay dabadeed qateen saxanadooda si ay ugu istareexaan qado gaar ah & barasho, halkaas oo saddex doodyahan ay wadaageen safarradooda iyo sheekooyinka hiddaha iyo xidhiidhka bulshada: Dr. Lyda Garcia (Jaamacadda Gobolka Ohio), Lillian Morales-Laster (Akadamiyadda Hoggaaminta Laatiinka Awood-siinta) iyo keena Manuel Ortega.

*Sawirrada ugu sarreeya: Xubnaha kooxda Bob Evans Farms oo ku istareexaya dhowr suxuun oo macaan oo muujinaya dhaqanka Hispanic-ga iyo Latino.*

*Sawirka hoose: Qado gaar ah & barasho doodayaasha wadaaga sheekooyinka hidaha iyo xidhiidhka bulshada.*